KABKA DARYEELKA CARUURTA

# Hagaha Lacagta iyo Biilka Xarumaha Daryeelka Caruurta ee Liisanka iyo Shahaadada Haysta



Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



## Mawduucyada


Hordhac . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 2

Child Care Subsidy Programs (Barnaamijyada Kabitaanka Dhaqaale ee Daryeelka Carruurta, CCSP) . . . . . . . . . . . . 2

- Barnaamijka 2 Working Connections Child Care (Daryeelka Caruurta Xidhiidha Shaqada, WCCC) 2
- Barnaamijka Seasonal Child Care (Xiliyada Daryeelka Caruurta, SCC) . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 2
- Barnaamijyada Badqabka Carruurta ee Daryeelka Carruurta . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 2

Masuuliyadaha iyo Doorarka 3 ee Adeeg-bixiyaha Xarunta Liisanka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 3

Masuuliyadaha DCYF . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 3

Masuuliyadaha Qoyska . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 3

Hannaanka Uqalmitaanka Daryeelka Carruurta . . . . 4

Xarunta Dabagalka Imaanshaha Maalinlaha ah iyo Dalabka FFN . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 5

- Heerarka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 5
- Dabagalka Imaanshaha Maalinlaha ah . . . . . . . . . 6
- Sheegashada Saxda ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 6
- Gudbinta Sheegashada Lacag Bixinta . . . . . . . . . 10
- Helitaanka Lacagta . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .11

Baahiyaha Gaarka ah ee Heerka Daryeelka Carruurta . . . .12

- Heerka 1 . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .12
- Heerka 2 . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .12

Khaladaadka Lacag Bixinta . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .13

- Khaladaadka Lacag Bixinta Kayar Inti Larabay . .13
- Khaladaadka Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay . .13

Lacagta laga Qaado Adeegyada Qoysaska Aan la Ogolayn . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 14

Siyaasadaha Qoran . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 14

Macluumaadka Canshuurta . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .15

Xadgudubyada Barnaamijka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 16

Xarumaha Barbaarinta . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 16

Kheyraadka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .17

- Macluumaadka Meelaha Lagala Xiriirayo . . . . . .17
- Macluumaadka Onlaynka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 18

## Hordhac

Hagahani wuxuu macluumaad ka bixinayaa dalabashada kabka Gobolka Washington ee lacaga iyo lacagta liisamada iyo shahaadooyinka xarumaha daryeelka caruurta. Hagahan waxaa soo saaray oona dhawray Department of Children, Youth & Families (Waaxda Carruurta Dhalinyarada & Qoysaska, DCYF) ee Gobolka Washington. Ka Wac Bixiyaha Leenka 1-800-394-4571 haddii aad ubaahan tahay caawin luuqad kale ah. Turjumaan ayaa kusoo biiri kara wicitaanka.

Adeeg-bixiyayaasha liisanka haysta ee Oregon iyo Idaho ee buuxiya shuruucda liisanka ee goboladooda ayaa ku haboonaan kara child care subsidy (lacagaha kabka daryeelka caruurta) ee Gobolka Washington marka la daryeelayo caruurta ku haboon ee ku nool Washington.



## Child Care Subsidy Programs (Barnaamijyada Kabitaanka Dhaqaale ee Daryeelka Carruurta, CCSP)

### Barnaamijka Working Connections Child Care (Xiriirinta Shaqada ee Daryeelka Carruurta, WCCC)

WCCC waxa ay ka caawisaa qoysaska uqalma inay bixiyaan kharashka daryeelka carruurta si markaa waalidka (waalidiinta) ay ooga qeyb qaadan karaan hawlaha sida shaqada, tababarka, barnaamijyada waxbarashada, iyo Temporary Assistance for Needy Families (Kaalmada Kumeelgaarka ah ee Qoysaska Danyarta, TANF) ee hawlaha macmiilka. Adeeg-bixiyayaasha liisanka haysta ama shahaado iyo adeeg-bixiyayaasha Family, Friend, and Neighbor (Qoyska, Saaxiibla, iyo Jaarka, FFN) ayaa ku haboonaan kara inay bixiyaan daryeelka caruurta ee ay lacagtiisa bixiso WCCC.

### Barnaamijka Seasonal Child Care (Xiliyada Daryeelka Caruurta, SCC)

Barnaamijka SCC wuxuu u adeegaa qoysaska ku haboon ee wakhtiyada qaar laga shaqaaleysiiyo shaqooyinka beeraha. Shaqaalaha wakhtiyada ayaa sidoo kale ku haboonaan kara kababka WCCC. Qoysasku waxay codsan karaa barnaamijka si fiican ugu haboon baahiyaha daryeelka caruurtooda. Kaliya adeeg-bixiyayaasha liisan haysta ama shahaado ayaa ku haboon inay bixiyaan daryeelka caruurta ee lacagtiisa uu bixiyo barnaamijka SCC.

SCC wuxuu siiyaa adeegyo qoysaska ku haboon ee ku nool degmooyinka soo socda: Adams, Benton, Chelan, Douglas, Franklin, Grant, Kittitas, Okanogan, Skagit, Walla Walla, Whatcom, iyo Yakima.

### Barnaamijyada Badqabka Carruurta ee Daryeelka Carruurta

Shakhsiyaadka ku qaadanaya adeegyada iyagoo u maraya Waalidka Ilmo-Korinta Loo Shaqaaleysiiyey, Ilaalinta Carruurta, iyo Barnaamijyada Badqabka Carruurta ayaa uqalmi kara in laga caawiyo bixinta adeegyada daryeelka carruurta. Shaqaalaha bulshada ee loo qoondeeyey Badqabka Carruurta ayaa dhammeystiraya ku haboonaanshaha, oggolaanshe bixiyaha, iyo oggolaanshaha lacagta.

## Masuuliyadaha iyo Doorarka ee Adeeg-bixiyaha Xarunta Liisanka

Xarun adeeg-bixiye oo liisan haysta ahaan, waxaad door gaar ah la leedahay carruurta kujirta daryeelkaaga. DCYF waxaa ka go'an in arrintaas ku caawiso iyaga oo u abuuraya qaar ka mid ah doorarka iyo masuuliyadaha aasaasiga ah ee dhammaan bixiyaasha.

Hagahan waxa uu kaa caawin doonaa inaad fahanto doorarka iyo masuuliyadaha ee loogu talagalay ilaalinta imaanshaha iyo u sheegashagashada lacag bixinta si sax ah. Waxa lagaaga baahan yahay inaad:

1. Buuxisid shuruudaha liisanka xarunta daryeelka caruurta ee Washington
2. Buuxisid shuruucda iyo shuruudaha kabitaanka daryeelka carruurta
3. Hayso diwaanada xaadiris dhameystiran oo saxa shantii sano ee ugu danbeysay marka loo eego shuruucda liisamada
4. Isticmaal nidaamka diwaanka xaadiriska ee ansixiyeen DCYF ama DCYF
5. Kasoo ururi lacagaha badhka ay toos u bixiyeen qoysaka ama dhinac saddexaad oo qoyska ah oo ugu sheeg DCYF 60 gudohood haddii aan la bixin
6. Raac dhamaan Washington Administrative Codes ( Furayaasha Maamulka Washington, WAC), oo ay ku jiraan WAC 110-15-0034 iyo WAC 110-15-0036, markaad dalbanaysid lacagta

## Masuuliyadaha DCYF

- Wuxuu go'aamiyaa oo uu qoraa siyaasadda iyo sharciyada uqalmitaanka CCSP
- U sheeg dawlada fadaraalka barnaamijyada kabka daryeelka caruurta Gobolka Washington
- Waxa uu hubiyaa diiwaanada imaanshaha iyo biilasha si loo qiimeeyo haddii ay jiraan lacag bixin kabadan ama kayar inti larabay in la bixiyo
- Waxa uu siiyaa qoysaska iyo bixiyayaasha ugu yaraan ogeysiis 10 maalmood oo maalmaha kalendarka ah marki la yareynayo ama la joojinayo gunnooyinka kahor dhammaadka taariikhdi hore ee Ogeysiiska Adeega Lacagta Bulshada
- Waxa uu si toos ah ula shaqeeyaa qoysaska si uu u go'aamiyo uqalmitaankooda adeegyada daryeelka carruurta
- Waxa uu ansixiyaa oo uuna lacagta kabitaanka dhaqaale ee daryeelka carruurta u diraa bixiyayaasha
- Waxa uu ka jawaabaa su'aalaha la xariira uqalmitaanka qoyska, oggolaanshaha, iyo lacag bixinada

## Masuuliyadaha Qoyska

Qoyska codsada ama qaata gunnooyinka CCSP waxa uu leeyahay masuuliyadaha ka shuruud ahaan qaadashada gunnooyinkaas. Kuwaan waxaa kamid ah laakiin aanan ku koobneyn:

- Dhammeystiridda hannaanka codsiga iyo soo gudbinta foomamka xaqiijinta lagama maarmaanka ah oo loogu baahan yahay in lagu go'aamiyo uqalmitaanka
- Bixinta ama sameynta qabanqaabada ay ku bixinayaan lacag bixintooda billaha ah
- Diiwaangelinta imaanshaha carruurta uu ku diiwaangeliyo nidaamka imaanshaha ama inuu haysto qof la oggolaaday in uu saxiixo imaanshaha iyo bixitaanka
- Soo sheegidda isbedellada bixiyayaasha shan maalmood gudahooda
- Codsashada daryeel dheeraad ah oo loogu talagalay hawl la oggolaaday





## Hannaanka Uqalmitaanka Daryeelka Carruurta

A. Shakhsigi raba in laga caawiyo lacagta kharashka daryeelka carruurta waxa uu lala xidhiidhi karaa:
   - Isaga oo Xarunta Lagala Xariiro Kabitaanka Dhaqaale ee Daryeelka Carruurta ee DCYF ee gobolka oo dhan ah ka wacaya 1-844-626-8687
   - Isaga oo la xariirayo shaqaalaha bulshada ee loo xilsaaray Badqabka Carruurta
   - Isaga oo codsiga onlaynka ka dhammeystiraya **https://www.washingtonconnection.org/home/**

B. DCYF waxay ururisaa oo dib u eegtaa macluumaadka si ay u go'aamiso u qalmitaanka qoyska.

C. Marki uqalmitaanka loo go'aamiyo CCSP, qoysasku waxa ay warqad ka helaan DCYF. Warqada ku haboonaanshaha waxa ku jiri kara taariikhaha bilowga iyo dhamaadka ee ku haboonaanshaha iyo xadiga lacagta bilaha.

D. Qoysaska uqalma waxa ay isticmaali karaan jawaabta taleefanka (1-844-626-8687) si ay u hubiyaan codsiga daryeelka canugooda iyaga oo riixaya 1 kadib marka ay wacaan Xarunta Lagala Xariiro CCSP. Qoysaska waxa ay ubaahnaan doonaan lambarka aqoonsiga macmiilkooda ama Social Security Number (Lambarka Amniga Bulshada) waxa ayna hubin karaan:
   - In codsigoodi la oggolaaday, in la diiday ama wali go'aan la sugayo
   - Xaalada ay ku sugan yihiin dukumiintiyada ay heshay DCYF
   - Taariikhaha bilowga iyo dhammaadka uqalmitaanka
   - Adeegyada daryeelka carruurta ee la oggolaaday
   - Cadada kharashka la bixinayo bishiiba

E. Bixiyayaasha waxa ay sidoo kale ka hubin karaan xaalada uu marayo codsiga qoyska iyaga oo isticmaalaya Working Connections Information Phone (Taleefanka Xogta Xiriirka Shaqada, WCIP) (1-866-218-3244). WCIP waxaa lagu heli karaa 24 saac maalin kasta, toddobo maalmood asbuuciiba luuqadaha Af-Ingiriis iyo Isbaanish. Si aad u isticmaasho WCIP, waxaad ubaahnaan doontaa:
   - Lambarkaaga bixiyaha daryeelka carruurta SSPS
   - Employee Identification Number (Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha, EIN)
   - Lambarka codsiga qoyska oo laga helo ogeysiiska SSPS

   Sababo la xariiro qarsoodi ahaanta, qaar kamid ah macluumaadka ayaa laga yaabaa inaadan heli karin adiga. WCIP waxa ay kuu oggoshahay inaad hubiso kuwa soo socdo:
   - Xaalada uu marayo codsiga – la oggolaaday, la diiday, la sugayo, la xiray, ama kujiro liiska sugitaanka
   - Taariikhaha dhaqangalka adeegga
   - Adeegyada la oggolaaday ee daryeelka carruurta
   - Cadada kharashka qoysku bixinayo bishiiba
   - Wixi farriimo gaar ah oo la xariira barnaamijyada kabitaanka dhaqaale

F. DCYF waxa ay u soodirtaa qoysaska baakadka dib-u-codsiga kahor inta aysan dhammaan muddada uqalmitaanka. DCYF ma bixin doonto kharashka daryeelki la bixiyo marki la dhaafo muddada uqalmitaanka ilaa qoyska loo go'aamiyo inuu uqalmo. Qoyska ayaa masuul ka ah bixinta kharashaadka adeegyada daryeelka carruurta muddada udhaxeysa uqalmitaanka iyada oo aanan caawin laga heleynin DCYF. Uqalmitaanka daryeelka carruurta dib looma taariikheeyo marki qoysasku dib u codsadaan kadib taariikhda dhammaadka muddada uqalmitaanka.

# Xarunta Dabagalka Imaanshaha Maalinlaha ah iyo Dalabka

## Heerarka

Heerarka kabka daryeelka caruurta gobolka ee ugu badan waxa go'aamiya gobolka deegaanka halka daryeelka laga bixinayo (fiiri maabka boga soo socda), da'da cunuga, xadiga daryeelka loo baahan yahay, iyo nooca daryeelka.

### DCYF WAXAY OGOSHAHAY HAL GALIN IYO LABO GALIN QEYBAHA DARYEELKA

Haddii lacagta aad ku qaadid heer saacad, todobaad, ama bile ah, heerarkaaga waxa loo badelayaa qeybaha hal galin ama labo galin sidan soo socota:

- Qeybaha hal galin ah waxa loo isticmaalaa marka cunugu u baahan yahay wax ka yar shan saac maalintiiba daryeelka
- Qeybaha labada galin ah waxa loo isticmaalaa marka cunugu u baahan yahay inta u dhaxaysa shan saac ilaa 10 saac maalintiiba daryeelka

### Saacadlaha

- Qeyb hal galin = Heerka Saacadlaha x 5
- Qeyb labo galin = Heerka Saacadlaha x 10
- Tusaale: Haddii aad lacagta ka qaadid $3 saacadiiba, heerkaaga halka galinba waa $15, oo heerkaaga labada galin waa $30


### Todobaadle

- Haddii aad lacagta ku qaadid heerka todobaadlaha, DCYF waxay u qeybisaa tirada maalmaha aad furan tahay todobaadkaa
- Tusaale: Haddii aad furan tahay shan cisho todobaadka oo aad qaadid $200 todobaadkii labada galinba, heerkaaga labada galinka waa $40

### Bilaha

- Haddii aad lacagta ku qaadid heerka bilaha, DCYF waxay u qeybinaysaa heerkaaga 22 labadaba caruurta da'da aan dugsiga gaadhin iyo kuwa da'da dugsiga
- Tusaale: Haddii aad ka qaadid $450 caruurta aan dugsiga gaadhin bishiiba, heerkaagu waa $20.45 labada galinba maalintii. Haddii aad ka qaadid $200 caruurta dugsiga gaadhay bishiiba, heerkaagu waa $9.09 hal galinba maalintii

## Maabka Gobolka ee Heerarka Kabka Daryeelka Caruurta




Gobolka 1 | Gobolka 4 | Spokane County
Gobolka 2 | Gobolka 5 | Gobolka 6
Gobolka 3

**Kaliya xarumaha daryeelka caruurta:**

- Degmada Clark waxay ku taalaa Gobolka 6 lakin waxa la bixiyaa heerka Gobolka 3.
- Degmooyinka Benton iyo Walla Walla waxay ka tirsanyihiin Gobolka 2 laakiin waxaa la bixiyaa heerka Gobolka 6.
- Degmada Whitman waxay ku taalaa Gobolka 1 lakin waxa la bixiyaa heerka gobolka 6.

## Dabagalka Imaanshaha Maalinlaha ah

Waa inaad isticmaashaa Nidaamka Xaadiriska Elektarooniga ee ay bixisay DCYF ama isticmaal nidaamka xaadiriska elektarooniga shakhsi saddexaad oo ay ansixisay DCYF. Marka la isticmaalayo nidaamka imaanshaha elektarooniga, qoyska ama qof ay oggolaadeen qoyska, waa in imaanshaha canuga iyo ka bixitaanka bixiyaha daryeelka carruurta lagu diiwaangeliyaa nidaamka imaanshaha elektarooniga ah. Macluumaadka kusahabsan xaadiriska elektarooniga ah waxaa laga heli karaa **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system**.

Bixiyayaasha isticmaalaya nidaamka gobolka, waa inaad dhammaan diiwaanada imaanshaha maalinlaha ah kusoo gudbisaan nidaamkiina imaanshaha inta iidnaan codsi udirin kahor SSPS ee lacag bixintiina. Macluumaadka kusahabsan xaadiriska elektarooniga ah waxaa laga heli karaa **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/EASManual.pdf**.



## Sheegashada Saxda ah

DCYF waxa ay soo dirtaa dukumiintiyada soo socdo marka laguu oggolaado lacag bixinta kabitaanka dhaqaale ee daryeelka carruurta:

1. Warqada Oggolaanshaha Bixiyaha, taasoo taxeysa cadada kharashka la bixinayo bishiiba, haddii ay wax jiraan, oo ay kugu leeyihiin qoyska bishiiba
2. Ogeysiiska Adeegga Bulshada
3. Warqada qaan-sheegashada biilka bishiiba ee lagu sheeganayo lacag bixinta
4. Risiidka bishiiba ee lacag bixinta (caddeynta lacag bixinta)

Haddii warqadaha ay ku jiraan wax khaladaad ah, ka wac Bixiyaha DCYF Leenka 1-800-394-4571 si aad u saxdo:

1. Magaca bixiyaha iyo lambarka bixiyaha SSPS
2. Adeegyada la Oggolaaday
3. Magacyada carruurta
4. Tirada halbeegyada iyo qiimaha canug kasta
5. Bilowga iyo dhammaadka taariikhda oggolaanshaha
6. Cadada kharashka qoysku bixinayo bishiiba

Waxaad sidoo kale heli doontaa Ogeysiisyada Adeegga Bulshada marka ay isbedello ku yimaadaan oggolaanshaha ama marka kabitaanada dhaqaalaha canuga ay dhammaadaan. Si aad ogeysiisyada iimayl ugu hesho oggolaanshaha bilowga, isbeddelka, ama dhammaadka taariikahaha, waxaad Leenka Bixiyaha DCYF kala xariiri kartaa 1-800-394-4571 ama iimayl ugu diri kartaa **providerhelp@dcyf.wa.gov** waxaadna siisaa ciwaan iimayl. Ka baro wax badan oo kusaabsan SSPS **www.dcyf.wa.gov/services/ssps**.

Biilka qaansheegashada waxaa lagugu soo dirayaa Boostada Mareykanka kahor maalinta udambeysa ee bilkasta. Biilka qaansheegashada u horreysa ee oggolaanshaha cusub waxaa laga yaabaa inaysan imaan ilaa bartamaha bisha soo socota. Waxaad kaloo ka gali kartaa biilka qaansheegashada adiga oo u maraya Bogga Bixiyaha Kusaleysan-Webseedka SSPS.

Marka aad hesho biilka qaansheegashada, dib u eegis kusamee diiwaanada imaanshaha elektarooniga ah si aad u go'aamiso tirada halbeegyada si aad u dalbato lacag bixinta iyadoo lagu saleynayo imaanshaha iyo oggolaanshaha canuga. Qeybaha iyo adeegyada daryeelka oo aad si sax u sheegan karto waxaa kamid ah kuwa soo socda:

## MAALMAHA/ QEYBAHA DARYEELKA LA SIIYEY CANUG KASTA

1. **Qeybta Labada Galinba.** Qeybta labada galina waxay leeg tahay 5-10 saac daryeel ah. Haddii daryeelka loo ansixiyo lana siiyo inta u dhaxaysa 5-10 saac hal maalin, waxaad dalban kartaa qeybta labada galinba maalintaasi. Maalmaha maqan, fiiri qeybta maalmaha maqan ee hoose.
2. **Qeybta Hal Galin ah.** Qeybta halka galin waxay leeg tahay ilaa 4 saac iyo 59 daqiiqo. Haddii daryeelka loo ansixiyo lana siiyo wax ka yar shan saac hal maalin, waxaad dalban kartaa qeybta labada galinba maalintaasi. Maalmaha maqan, fiiri qeybta maalmaha maqan ee hoose.
3. **Daryeelka Wakhtiga Dheeriga** Caruurta qaar ayaa u baahan daryeel ka badan 10 saac maalintii. Si aad u codsatid daryeel caruur oo dheeriya, qoysku wuxuu la xidhiidhayaa DCYF wuxuuna siinayaa qoraal muujinaya saacadaha dheeriga ee loo baahan yahay. Waxa lagu siin karaa lacagta noocan daryeelka haddii aad leedahay siyaasad qoran oo aad lacagta kaga qaadaysid qoysaska iskood u bixinaya heer ka sareeya si aad u daryeeshid caruurta in ka badan 10 saac maalintii. Gobolku wuxuu ku bixin doonaa daryeelka heerka hal galin. Daryeelka ka badan 15 saac wuxuu u baahan yahay ansixinta kormeeraha waxaana lag bixiyaa inta ugu badan gobolka heerka kabka daryeelka.
   a. **Haddii cunugu ka qeyb galo wax ka yar 10 saac maalintii, oo aan la qorsheyn inuu ka qeybgalo wax ka badan 10 saac maalintii, xataa haddii wakhti dheeriya jiro, waxa macquula inaanad dalban daryeel dheeriya.**
   *Tusaale ahaan: Cunuga waxa loo qorsheeyey oo loo ogolaaday inuu ka qeybgalo Isniinta – Khamiista laga bilaabo 7:30 a.m. - 5:30 p.m. – 10 saac. Adeeg-bixiyayaasha ayaa dalban kara qeybta labada galin. Cunuga waxa loo ogolaan karaa daryeel wakhti dheeriya, haseyeeshee, lama qorsheyn inuu ka qeybgalo maalintii wax ka badan 10 saac. Haddii cunugu ka qeybgalo 10 saac ama wax ka yar daryeelka oo aan la qorsheyn inuu ka qeybgalo, xataa haddii loo ogalaado wakhti dheeriya, adeeg-bixiyuhu ma dalban karo daryeel wakhti dheeriya. Cunuga waxa loo qorsheeyey oo loo ogolaaday inuu ka qeybgalo Isniinta – Khamiista laga bilaabo 7:30 a.m. - 7:30 p.m. – 12 saac. Cunuga waxa loo qorsheeyey oo loo ogolaaday inuu ka qeybgalo maalintiiba 12 saac oo daryeela. Haddii cunugu ka qeybgalo daryeelka, lana soo qaado ka hor markii loo qorsheeyey oo uu tago ka dib wax ka yar 10 saac oo daryeelka ah, adeeg-bixiyayaashu waxay dalban karaan qeybta dalabashada iyo sidoo kale daryeelka wakhtiga dheeriga ah.*

   b. **Haddii cunuga loo qorsheeyey oo loo ogolaaday daryeelka wakhtiga dheeriga lakiin aanu ka qeybgalin maalintaasi, waxaad dalban kartaa daryeelka wakhtiga dheeriga ilaa iyo inta aanay kugu keenayn culays.**
   *Tusaale ahaan, cunug loo qorsheeyey inuu ka qeybgalo Isniinta – Khamiista laga bilaabo 7:30 a.m. - 7:30 p.m., 12 saac, oo ka maqan maalinta oo dhan. Adeeg-bixiyayaasha ayaa dalban kara qeybta labada galin iyo sidoo kale daryeelka wakhtiga dheeriga.*



### KHARASH BIXINTA QOYSKA

Qoysaska badankoodu waa inay sameeyaan kharash bixinta si ay u bixiyaan qeyb kamid ah kharashka daryeelka carruurta ee bishiiba. Qoyska ayaa ka masuul ah inuu ku siiyo adiga kharashka bilkasta. Qoyska ayaa laga yaabaa inuu leeyahay kharash bixin loo qoondeeyey bixiye kale, ama waxaa loo kala qeybin karaa bixiyayaal dhawr ah. Haddii laguu qoondeeyo lacag bixin, oo aadna helin lacag bixintaas, waa inaad muddo 60 maalmood gudahooda kusoo wargelisaa Leenka Bixiyaha DCYF 1-800-394-4571 ama iimaylka **providerhelp@dcyf.wa.gov**.



### MAALMAHA MAQNAANSHAHA

Marka cunug loo ansixiyey kabka uu ka qeybgalo ugu yaaran hal maalin bisha jadwalka ee mudada la ogol yahay, waxaad ku haboon tahay inaad dalbatid maalmaha maqnaanshaha bishaasi. Maalmaha maqnaanshuhu waa maalmaha cunuga loo qorsheeyey inuu ka qeybgalo ee uu ka maqan yahay. Tani waxay ku saleysan tahay jadwalka waalidku kula leeyahay manaaha waxa ku jira jadwalka DCYF nidaamkooda. Waxa macquula inaanad dalban lacagta maalmaha badan ee aan la ansixin bishaasi. Waxa ka reeban tani waa caruurta da'da dugsiga ee loo ogolaaday maalmaha halka galin si loogu saamaxo maalmo kale oo hal galin ah in la codsado marka loo baahdo daryeelka markaanu dugsiga joogin. "Maalmaha" macneheedu waa maalmaha jadwalka haddii aan la cadeyn. Ogolaanshaha qaar ayaa bilaabma ka dib maalinta koobaad ee bisha, iyo ogolaanshaha qaar ayaa dhamaada ka hor maalinta u danbeysa ee bisha. Ha dalban maalmaha maqnaanshaha ee ka baxsan taariikhaha la ogol yahay. Haddii aad go'aansatid inaad joojisid bixinta daryeelka cunuga, ma dalban kartid maalmaha maqnaansha ee maalmaha ka dib taariikhda daryeelku markay dhamaato. "Jadwalka ka qeybgalka" macnihiisu waa in cunuga laga filaayo inuu ka qeybgalo marka loo eego jadwalka hawlaha la ansixiyey ee qoyska, iyo xaadiriskiisu aanu ku keenin culays. Haddii xaruntaadu furan tahay Isniinta – Jimcaha (shan cisho todobaadkiiba) inta ugu badan bilaha sanadka, xaruntaadu waxay furnaan doontaa wax ka yar 23 cisho. Tusaale: Julaay, waxa jira 23 maalmood oo macquula Isniinta – Jimcaha, iyo Ogos, waxa jira 22 maalmood.

| JULAAY | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| S | M | T | W | T | F | S |
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 |
| 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 | 13 |
| 14 | 15 | 16 | 17 | 18 | 19 | 20 |
| 21 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 | 27 |
| 28 | 29 | 30 | 31 | | | |

| OGOS | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| S | M | T | W | T | F | S |
| | | | | 1 | 2 | 3 |
| 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 |
| 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 |
| 18 | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 |
| 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 | 31 |

## MAALMAHA FASAXA

Haddii aad xidhan tahay maalinta fasaxa oo ku haboon mudada la ogol yahay, waxaad dalban kartaa maalinta waxaana loo bixin karaa maalinta cunugu ka qeybgalo, oo tilmaamaysa maalin fasaxa diwaanka xaadiriska. Waxaad dooran kartaa inaad furtid maalinta fasaxa ama xidhid maalinta fasaxa maalin kale oo badelkaada ah isla sanadkaasi.

- Maalmaha Fasaxa Ku Haboon Waa:
  - Maalinta Sanadka Cusub, Janaayo 1
  - Martin Luther King Jr. Maalinta, Isniinta Saddexaad ee Janaayo
  - Maalinta Madaxweynaha, Isniinta Saddexaad ee Febraayo
  - Maalinta Xuska, Isniinta u Danbeysa ee May
  - Juneteenth, Juun 19
  - Maalinta Madaxbanaanida, Julaay 4
  - Maalinta Shaqaalaha, Isniinta Koobaad ee Sabteembar
  - Maalinta Mujaahidiinta, Noofeembar 11
  - Khamiista Thanksgiving, Khamiista Afraad ee Noofeembar
  - Maalinta Dhaxalka Mareykanka Dhaladka, Jimcaha Afraad ee Noofeembar
  - Maalinta Kirismaska, Diseembar 25
- Haddii aad furan tahay kaliya Isniinta ilaa Jimcaha maalinta ku haboon fasaxu waa:
  - Sabtida: Jimcaha ka horeeya waa maalinta ku haboon fasaxa
  - Axada: Isniinta ka danbeysaa waa maalinta ku haboon fasaxa
- Haddii aad furan tahay maalmaha fasaxa todobaadka, maalmaha fasaxa saxda waa maalinta ku haboon fasaxa.
  - Sabtida ilaa Axada iyo maalinta fasaxu waa Axada, ka dib waxaad dalban kartaa Axada oo maalinta ku haboon fasaxa ah
  - Haddii aad furan tahay maalinta ku haboon fasaxa oo aad dooratid inaad u dalbatid maalin kale fasax ahaan isla sanadkaasi maalinta rasmiga ee fasaxa, waxaad dalban kartaa maalintaasi. Waa inaad xidhaa maalinta aad u dalbatay maalin fasax rasmiya
  - Haddii aad furan tahay kaliya Sabtida ilaa Axada maalinta ku haboon fasaxu waa Axada. Waad u xidhaysaa Isniinta maalin fasax ahaan. Waxaad u dalban kartaa Isniinta maalinta fasaxa lakiin maaha Axada. Uma dalban kartid labo cisho hal maalin oo fasax ku haboon

## MAALMAHA TABABARADA XIRFADA

Maalin horumarin xirfadeed waa maalinta daryeelka cunugaaga la xidho si aad uga qeybgali kartid tababarka. Waxaad dalban kartaa ilaa shan maalmood oo tababar xirfadeed ah sanadkiiba. Maalmo kasta oo inka badan shan maalmoodoo tababar aad u xidhid tababarka waxa loo tixgalinayaa maalmaha xidhnaanshaha oo lama dalban karo. Haddii aad u xidhid tababarka xirfada maalinta ogolaanshaha, oo cunuga loo qorsheeyo inuu ka qeybgalo maalinta aad xidhid, waad dalban kartaa maalintaasi.

## MAALMAHA XIDHNAANSHAHA

Waxa macquula inaanad ku haboonaan inaad u dalbatid lacagta kabka maalmaha aad xidhan tahay sababo aan ka ahayn maalmaha tababarka xirfada ama maalmaha fasaxa ku haboon.

## NONSTANDARD HOURS BONUS (ABAALMARINTA SAACADAHA AAN CAADIGA AHAYN, NSHB)

Saacadaha aan caadig ahayn waxa lagu qayaxaa sida:

- Saacadaha maalmaha todobaadka ka hor 6 a.m. ama ka dib 6 p.m.
- Sabtida iyo Axadaha
- Maalmaha Fasaxa ku Haboon

DCYF waxay u ogolaan doontaa $150 NSHB ah bishii halkii ilme hadii ilmaha uu u baahan yahay 30 saacadood ama wax ka badan oo daryeelka aan caadiga ahayn ah.

Waxaad u dalban kartaa NSHB cunuga haddii aad siisid 30 saac ama wax ka badan oo daryeelka caruurta ee bishaasi ah. Gali "1" sanduuqa "Qeybta Wadarta" ee qaansheegta. Haddii aad siisay wax ka yar 30 saac oo daryeelka aan caadiga ahayn ee bishaasi ah, ha ka dalban NSHB. Gali "0" sanduuqa "Qeybta Wadarta" ee qaansheegta.

Haddii laguu ogolaaday inaad siisid daryeelka inta lagu jiro saacadaha aan caadiga ahayn oo aad siisid ugu yaraan 30 saac oo daryeel ah inta lagu jiro wakhtiga NSHB ee bisha, waxa lagu talinayaa inaad dalbatid NSHB qaansheegtaada bilkasta oo aad siisid daryeelka.

Haddii la ogol yahay bisha qeyb ahaan, waa inaad hubisaa in daryeelka aan caadiga ahayn ee la bixiyey bisha qeyb ahaan la ogol yahay leeg yahay 30-saac ugu yaraan. Tusaale ahaan, haddii laguu ogol yahay bilowga 15-ka bisha ilaa dhamaadka bishaasi, waa inaad siisaa 30 saac ama wax ka badan daryeelka inta u dhaxaysa 15-ka iyo dhamaadka bisha si aad u dalbatid NSHB bishaasi.

### JOOJINTA AAN LA QORSHEYN

Marmarka qaar, qoysku kuma haboonaado kabka daryeelka cunuga ka hor dhamaadka mudada ogolaanshaha. Markay tani dhacdo, DCYF waxay kusoo ogeysiin doontaa adiga iyo qoyska joojinta aan la qorsheyn ee daryeelka cunuga isla wakhtigaasi ka hor intaan qoyska la ogeysiin. Haddii aad siiyey ciwaan iimayl DCYF, waxaad heli doontaa ogeysiis iimayl iyo sidoo kale iimayl caadiya.

DCYF waxa looga baahan yahay inay bixiso 10 maalmoood oo ogeysiis qoran ah ka hor joojinta aan la qorsheyn, waxaanad dalban kartaa 10 maalmood gudohood. Haddii ogeysiiska joojintu gaadho bisha xigta, waxaad dalban kartaa daryeelka maalmaha cunugu laga filaayo inuu ka qeybgalo inta lagu jiro 10 ka maalmood ee mudada joointa, xataa haddii cunugu aanu ka qeybgalin bishaas.

### SAACADAHA BAAHIYAHA GAARKA AH

Ka Eeg Qeybta Baahiyaha Gaarka ee bogga 12-aad ee hagahan.

### LACAGTA ISDIWAANGALINTA

Haddii aad leedahay siyaasad qoran oo aad lacagta kaga qaadid isdiwaangalinta qoysaska gaarka, waxaad dalban kartaa $50 cunugiiba ama lacagta isdiwaangalinta caadiga sanadkiiba, kolba midka yar. Haddii aad badeshid lacagta isdiwaangalinta sanadlaha, wac Khadka Adeeg-bixiyaha si aad u codsatid dibu ogolaanshaha lacagta isdiwaangalinta ee sanadkiiba. Waxa laga yaabaa inaanad dalban lacagta isdiwaangalinta marka cunugu ku jiro daryeelkaaga lakiin badelo barnaamijyada kabka. Waxaad dalban kartaa lacagta isdiwaangalinta:

- Marka cunuga hela kabka isdiwaangalinta koobaad ee daryeelkaaga, xataa haddii aanu ka qeybgalin
- Marka cunug hela kabku ka tago daryeelkaaga kunasoo noqdo 60 maalmood ka dib, xataa haddii ay ku jirto isla sanadkaasi
- Sanad kasta, haddii aad leedahay siyaasad qoran oo aad lacag kaga qaadid qoysaska dhamaan lacagta isdiwaangalinta sanadlaha

Ka wac Khadka Adeeg-bixiyaha 1-800-394-4571 ama iimayl u dir **providerhelp@dcyf.wa.gov** wixii macluumaad dheeriya.

### ADEEGYADA HALKA-MAR LA OGGOL YAHAY

Adeegyada halka-mar laguu oggol yahay sida lacag soocelinta tababarka ama waxbarashada ama dhiirigelinta.

### DHIIRIGALINTA HEERKA CUNUGA

Laga bilaabo Julaay 1, 2024, DCYF waxay ogolaan doontaa xadiga kor u qaadida ilmaha sabiga ah $300 bishii, ilmihii, ilmaha ku jira daryeelka la kaabo ee loo ogolaaday kuwa liisanka haysta iyo bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee shahaadada haysta ee:

- Aqbalaya kabka gobolka
- Kaqaybqaado oo waa meel wanaagsan Early Achievers Quality Rating and Improvement System (Qiimaynta Tayada Barbaarinta Caruurta iyo Hagaajinta Nidaamka, QRIS)
- Daryeelka caruurta laga bilaabo dhalashadooda ilaa 11 bilood

Si aad u codsato kor u qaadista heerka cunuga gali “1” ee “Wadarta Qaybaha” khaanada kujirta qaan-sheegta. Haddii aanad buuxin shuruudaha sare, ha codsan kor u qaadista heerka cunuga.

## Gudbinta Sheegashada Lacag Bixinta

Waxaa jira dhawr siyaabood oo aad ugu gudbin karto DCYF dalabkaaga lacag bixinta. Inta aadan gudbin kahor biilka qaansheegashadaada, buuxi qeybaha daryeelka la siiyey canug kasta ee qaansheegashada, saxiix oo taariikhda ku qor. Waa inaad kusoo gudbisaa dalabkaaga lacag bixinta saddex bilood gudahooda laga bilaabo taariikhda qaansheegashada.

Ku gudbi qaansheegashadaada adiga oo isticmaalaya **kaliya mid kamid ah** xulashooyinka soo socda:

### BOOSTO

Koobiga qaansheegashada aad dhammeystirtay boosto ugu dir DCYF:

Washington State Department of Children; Youth & Families
SSPS
P.O. Box 45812
Olympia, WA 98504-5812

### TALEEFOON

Adeegga Invoice Express (Qaansheegashada Degdegga) ka wac 1-888-461-8855. Tilmaamaha sida loo isticmaalo Invoice Express (Qaansheegashada Degdegga) waxaa laga heli karaa **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0043.pdf**.

### BOGGA KUSALEYSAN WEBSEEDKA SSPS

Tilmaamaha kusaabsan sida loo galo oo laga isaga diiwaangeliyo bogga bixiyaha kusaleysan webseedka SSPS waxaa laga heli karaa **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPSPortalRegistration-SAW.pdf**. Waxaa jira saddex qeybood oo waaweyn oo lagu dejinayo gelitaanka:

- Qeybta 1: Qeybta Ka furo akoon ciwaan Secure Access Washington (Gelitaanka Ammaanka ah ee Wahington, SAW) **secureaccess.wa.gov**
  - Haddii ay dhibaato kaa haysato dejinta ciwaankaaga SAW, ka wac adeegga macmiilka SAW 24 saac maalintii, toddobo maalmood asbuucii, 1-855-928-3241
- Qeybta 2: Iska Diiwaangeli Bogga Gobta Bixiyaha
- Qeybta 3: Iska Diiwaageli Laqabsiga Hubinta

## Helitaanka Lacagta

Dhammaan bixiyayaasha cusub waxaa lacagta loogu soo shubayaa si toos ah. Haddii aadan xiriir la lahayn bangi maaliyadeed, waxaad qoraal ku gudbin kartaa codsi tilmaamaya xulashadaada lacag bixinta in boosto ay kuugu soo diraan Adeegga Boostada U.S.

### BOOSTO

Sheegashooyinka qaansheegashada la sameeyo inta udhaxeysa 1-da iyo 4:30 p.m. ee 15-ka bisha waxaa boosto laguugu soo saari doonaa 16-ka ama maalinta u horreysa ee shaqada ee ka dambeysa. Haddii 15-ka bisha ay ku aado maalmaha fasaxa asbuuca ama ciid, 4:30 p.m. waxaa loo goynayaa maalinta udambeysay ee shaqada ee ka horreysa 15-ka.

Sheegashooyinka qaansheegashada la gudbiyo wixi ka dambeeyo 4:30 p.m 15-ka bisha ilaa 4:30 p.m ee maalinta udambeysa bisha ee la shaqeynayo waxaa la bixin doonaa maalinta u horreysa ee la shaqeynayo ee bisha xigta.

Lacagaha lagu bixiyo boostada waxa ay soogalaan Adeegga Boostada U.S. ilaa saddex maalmood oo maalmaha shaqada ah kadib marka la socodsiiyo. DCYF ma dammaanad qaadi karto taariikhda keenista jeegaga lagu soo diro Adeegga Boostada U.S.

Waxaad ka heli kartaa kalandarka tusinaya taariikhaha sheegashada lacag bixinta iyo taariikhaha waarantiga (jeega) boostada ee ku aadan halkan **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPS-WarrantIssuanceCalendar.pdf**.

### KUSOO SHUBISTA TOOSKA AH

Sheegashooyinka qaansheegashada loogu soo gudbiyo lacag bixinta kusoo shubista tooska ah waxaa la socodsiiyaa maalinta udambeysa ee bisha qaansheegashada ama taariikhda soo gudbinta, hadbo kii dambeeyo. Lacag ku bixinta kusoo shubitaanka tooska ah waxa ay dhacdaa 3-5 maalmood oo maalmaha shaqada ah oo ka dambeeya taariikhda socodsiinta qaansheegashada.

Akoonka kusoo shubista tooska ah ee cusub ama inaad isbedello kusameyso akoon horay aad u lahayd, waxaad marka koobaad buuxin kartaa foomamka Diiwaangelinta/W9 ee Kusoo Shubista Tooska elektaroonig ahaan (oo onlayn laga helayo **www.dcyf.wa.gov/services/ssps/direct-deposit**), kadibna daabac oo boosto ama fakis ugu dir foomamka:

SSPS Provider File Unit
P.O. Box 45812
Olympia, WA 98504
Faakis: 360-902-8268

Ka codso koobiga warqada ee baakada codsiga **DSHSSSPSWeb@dshs.wa.gov** ama adiga oo wacaya 360-664-6161 (Xulashada 1-aad). Xaqiiji inaad u sheegto SSPS inay tahay furashada akoon cusub ama badalida mid hore.

Ma ubaahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta foomamka? Ka akhri onlaynka Tilmaamaha Isdiiwaangelinta Kusoo Shubashada Tooska **ofm.wa.gov/it-systems/accounting-systems/statewide-vendorpayee-services/vendorpayee-direct-deposit**.



## Qiimaha Baahiyaha Gaarka ee Daryeelka Carruurta

Qiimaha baahiyaha gaarka ah waa daryeelka aad siiso canug qaba baahi gaar ah ka sarreeyo oona ka baxsan daryeelka joogtada caadiga ee maalinlaha ah. DCYF lacag kuma bixiso tababarka, hagaajinta dhismayaasha, ama agabka.

Waxaa lagugu siin karaa qiimo dheeraad ah ee daryeelka carruurta iyo dadka waaweyn:

a. Ilaa da'da 19 sano jir kuwaas oo qaba xaalad la xaqiijiyey oo jirka, maskaxda, dareenka, habdhaqanka ah oo ubaahan daryeel gaar ah oo heer sare ah; ama
b. Da'da 13 sano jir ilaa 19 sano oo hoos yimaada kormeer maxkamadeed

Cunuga leh baahiyaha gaarka waxa loo ogol yahay Heerka 1 iyo Heerka 2. Heerka baahiyaha gaarka waxa lagu bixiya oo dheeri ah heerka maalinlaha ee daryeelka cunuga gobolka oo qaansheegta isla lambarkaasi leh saacadaha aad qababaty qeybaha baahiyaha gaarka.

### Heerka 1-aad

Oggolaanshaha heerka 1-aad waxaa loogu talagalay qiimaha baahiyaha gaarka gobolka ee caadiga ah. Kahor inta aanan la oggolaan qiimaha baahiyaha gaarka ee heerka 1-aad, adiga iyo qoysku waa inaad buuxisaan foomka Codsiga Qiimaha Daryeelka Carruurta ee Qaba Baahiyaha Gaarka, laga helayo onlaynka **https://www.dcyf.wa.gov/forms?field_number_value=12-001&title**= . Foomku waa in la saxiixaa oo boosto ama fakis loogu diraa DCYF:

Child Care Subsidy Contact Center
P.O. Box 11346
Tacoma, WA 98411-9903
Fakis: 1-877-309-9747

### Heerka 2-aad

Qoysku waxa uu la shaqeynayaa adiga iyo DCYF si loo go'aamiyo haddii canugoodu uqalmo qiimaha heerka 2-aad ee baahaiyaha gaarka ah. Marka laga yimaado foomamka Codsiga Qiimaha Daryeelka Carruurta ee Qaba Baahiyaha Gaarka, DCYF waa inay ka heshaa cadeyn xaqiijin qoraal ah oo kasocota adeegga caafimaadka, caafimaadka maskaxda, adeegga bulshada, ama xirfadle waxbarasho oo haysta ugu yaraan shahaadada jaamacada heerka mastarka ama kalkaaliso diiwaangashan. Cadeynta xaqiijinta waa inay qeexdaa heerka dheeraadka ah ee daryeelka gaarka ah ee looga baahan yahay goobta daryeelka carruurta ka sarreeya oona kabaxsan waxa aad siin lahayd carruurta aanan qabin baahiyaha gaarka ah.



# Khaladaadka Lacag Bixinta

Xaddidnaanta waqtiga ee loogu talagalay adiga ama gobolka khaladaadka lacag bixinta oo aad ku raadsataan dib ubixinta lacagta waa:

- Labo sanadood haddii khaladku yahay qiimaha lagu bixiyo da'da ama gobolka. Xaddidkan labada sanadood ah ma khuseeyo xisaab-xirka federaalka, taasoo dib u laaban karta saddex sanadood
- Ilaa saddex sanadood haddii khaladku yahay arrin kale

## Khaladaadka Lacag Bixinta Kayar Inti Larabay

Lacag bixinta kayar inti larabay waa ay dhici kartaa khalad kajira qaansheegashadaada darteed, haddii aadan helin lacagta wax kasta oo aad ku sheegatay qaansheegashada ama haddii lagu siiyey qiimo aan sax ahayn. Raac tallaabooyinka hoose:

1. Ka hubi qaansheegashadaada diiwaanadaada si aad u aragto haddii magaca canuga uu ka muuqdo qaansheegashada
2. Isu barbardhig diiwaanada soo xaadiritaanka iyo qaansheegashadaada si aad u aragto haddii lagu siiyey lacag kayar lagu siiyey
3. Wac Leenka Bixiyaha 1-800-394-4571 si aad ugu sheegto in lagu siiyey lacag kayar inti ay ahayd

Si aad u saxdo lacag kayar inti larabay, waa inaad qaansheegashada u gudbisaa gobolka ee adeegyada daryeelka carruurta muddo aanan ka dambeynin saddex bilood kadib marka taariikhda aad gudbisay qaansheegashada.

## Khaladaadka Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay

In lagu siiyo wax kabadan inta aad heli lahayd waa ay dhici kartaa sababtoo ah:

- Ma isticmaashid nidaamka imaanshaha elektarooniga ee DCYF ama ma lihid kadhaafitaan la oggolaaday
- Ma haysatid diiwaanada imaanshaha oo ay iswaafaqayaan diiwaanka sheegashadaada (WAC 110-15-0034)
- Waxaad lacagta ku heshay qiimo khalad ah
- Ma haysatid risiidyada saxda ah oo aad ku taageertid lacag bixinta
- Lacag la dalbaday ayaan lagu sheegin buuga

1. Haddii aad ka shakido in lagu siiyey lacag kabadan inta aad u maleyneyso inaad hesho, wac Leenka Bixiyaha 1-800-394-4571 ama iimaylka **providerhelp@dcyf.wa.gov**. Waxa ay kaa caawin karaan inay xalliyaan khaladka kahor inta DCYF ku dejin lacag bixin kabadan inti larabay oo rasmi ah Office of Financial Recovery (Xafiiska Soo Kabashada Maaliyadeed, OFR).
2. DCYF waxa ay la socotaa lacag bixinta daryeelka carruurta ee wixi khaladaad suuragal ah. Si loo dajiyo haddii khalad uu ansax yahay, DCYF waxa ay dib u eegtaa soo xaadiritaanka ama waxa ay ku weydiineysaa inaad siiso koobiyo kamid ah diiwaanadaada. Marka ay codsato DCYF, waa inaad kusoo gudbisaa risiidyada 45 maalmood oo kalandarka ah gudahooda ee marka la codasado. Waxaa muhiim ah inaad ka jawaabto wixi codsi ah oo kusaabsan diiwaanadaada imaanshaha. Waxaad la xariiri kartaa waaxda kaa codsaneysa diiwaanada adiga oo tixraacaya macluumaadka lagala xariiro ee kudaabacan codsiyada.
3. Haddii la ogaado in khaladku ansax yahay oona lacag inti la rabay kabadan la dajiyey, waxaad Ogeysiiska Bixinta Iibiyaha Lacagta Dheeraadka ah ka heli doontaa OFR. Ogeysiiskan waxaa kujira:

   a. Sababta, nooca lacag bixinta, carruurta ku habboon, iyo muddada lacag bixinta

   b. Tilmaamaha kusaabsan sida dib loogu bixiyo lacagta dheeraadka ah (qorshayaasha lacag bixinta ee la heli karo)

   c. Tilmaamaha sheegaya sida loo gudbinayo cabashada Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay. Waxaad la xidhiidhi kartaa waaxda taasoo aasaastay Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay (ka eeg ogaysiiska lacag bixinta ka badan h si aad u hesho macluumaadka xidhiidhka) si ay suurogal u noqoto xalin, iyo sidoo kale waxaad codsan kartaa Dhagaysi Maaamul si aad doodoLacag Bixinta Kabadan Inti Larabay. Si aad u codsato dhagaysi, waa inaad samaysaa:

      i. Udir codsigaaga dhagaysigaaga adigoo u marinaya iimaylka la aqoonsanyahay ama nidaam kale kaasoo cadaynaya helitaanka OFR.

      ii. Hubi in dhagaysiga codsiga ay heshay OFR 28 cisho gudahood oo ka bilaabmaysa taariikhda aad heshay Ogaysiiska Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay.

      iii. Oo ay kujirto bayaanka sababta aad uga fikirayso Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay inay qalad tahay oo ay ku jiraan Ogaysiiska Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay ee Macmiilka. Hadii Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay aan la xalin iyadoo lala hadlayo shaqaalaha kujira khadka bixiyaha DCYF ama iyadoo loo marayo dhagaysiga maamulka, waa inaad dib u bixisaa lacagta.

4. Kadib Ogaysiiska Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay ee Macmiilku kuusoo diray isagoo kuusoo marinaya iimaylka layaqaan ama adeega shaqsiga ah, OFR waxay bilaabi doontaa ururinta talaabada kadib ugu yaraan 30 cisho. Haddii aad codsato dhageysi wax ka badan 28 maalmood ka dib helitaanka ogeysiiska, tallaabadani ma joojinayso inta lagu jiro nidaamka dhageysiga.
5. Ogaysiiska lacag bixin kasta oo ka badan intii la rabay waa dhacdo gaar ah. Waa inaad codsato dhageysi talaabo kasta oo aad rabto inaad ka dooddo. Waxa laga yaabaa inaad hesho ogaysiisyo lacag bixin kabadan intii la rabay ah inta aad haysato hal ama dhowr dhegaysi oo ku jira niadamka dhagaysiga.



Markaad dib u bixinayso lacag bixinta ka badan intii lagaa rabay, waa muhiim inaad ogaysiiso Xafiiska Cashuurta si loo hubiyo inay ogyihiin oo ay samayn karaan isbadalada daruuriga ah marka la eegayo warbixinta cashuurta. Eeg qaybta Macluumaadka Cashuurta si aad u hesho Macluumaadka Xiriirka.

## Lacagta Qoysaska Adeega aan La Ogolaan

Waxa laga yaabaa in lacag laga qaado qoysaska hela kabka Daryeelka Ilmaha ee adeegyadan soo socda hadii sidoo kale aad haysato siyaasad qoran si aad ugu dalacdo lacag qoysaska bixinaya.

- Sababaha dheeraadka ah ee daryeelka ilmaha shaqsiga, sida magaabisaha shaqsiga ah ee aan lagu darin ogolaanshaha
- Kharashaadka safarada dibada ah
- Barnaamijyada cuntada ikhtiyaariga ah ee aad siiso qoysaska aan siin qadada ilmahooda
- Gaadiidka geeya ama kasoo celiya dugsiga ama hawlaha
- Qaadista habsanka ah ama ilmaha yimaada kadib saacadihii shaqada
- Lacagta xadidan ee habsanka ah ee daryeelka ilmaha
- Non-sufficient funds (Maaliyada aan ku filnayn, NSF) lacagaha uu qaado bangigu marka maaliyada bangiga aan la heli karin

Waxa laga yaabaa inaanad lacag ka qaadin qoysaska kuwaasoo hela kababka daryeelka ilmaha:

- Farqiga u dhaxeeya xadiga ugu badan ee kaabista daryeelka ilmaha ee ugu badan iyo xadiga sida gaarka ah la iskaga bixiyo, hadii xadigu sareeyo.
- Lacagta diiwaangelinta marka ay ka badan tahay lacagta diiwaangelinta barnaamijka kabitaanka
- Lacagta hawsha lagu qabanayo si loo habeeyo lacag bixinta qoyska
- Lacagta qalabka, agabka, ama alaabaha loo baahanyahay si loo buuxiyo shuruudaha liisanka
- Kharashaadka lagu codsanayo doodaha kuu dhexeeya adiga iyo gobolka
- Maalmaha aad xidhnayd

## Siyaasadaha qoran

Waa inaad haysataa siyaasadaha qoran kuwaasoo faah-faahinaya xadiga aad kaqaado dhamaan adeegyada iyo lacagaha. Lacagaha laga qaado qoysaska gaarka ah waa inay noqotaa mid joogto oo ay kujiraan qoysaska la kabo.

Marka ay codsato DCYF, waa inaad kusoo gudbisaa nuqulada siyaasadahaaga qoran 45 maalmood oo kalandarka ah gudahooda ee marka la codasado. Haddii aadan ku bixinin nuqulada 45 maalmood oo kalandarka ah gudahooda, waxaa laguugu qori karaa in la bixiyey lacag kabadan inti la rabay guud ahaan lacagti aad sheegatay bishaas.

## Macluumaadka Canshuurta

DCYF waxay diraysaa diwaanka lacag bixinaha loogu yeedho Latalinta Xawilaada. Tan waxa kujira liiska laga jarayo kuwaasoo loo isticmaali karo ujeedooyinka cashuurta, oo ay kujiraan lacagaha joogtada ah. Hadii shaqsigu ama shirkadu doonayso inay cadayso dakhligaaga, waxaad siin kartaa talada xawilaada. Qaar ka mid ah macluumaadka ku saabsan talada xawaaladaha waa qarsoodi mana aha in la sheego. Waa lamid inaad ku bixiso jeeg.

Haddii aad u baahan tahay wax lagu daro talada xawaaladaha, waxaad DCYF ka codsan kartaa foomka "caddaynta dakhliga". Udir codsigaaga adigoo u qoraya:

SSPS Attn: Cadaynta Dakhliga
P.O. Box 45812
Olympia, WA 98504-5812
Iimayl: **SSPSvoe@dshs.wa.gov**
Xaqiijinta Mushaharka ee Faakis: 360-664-6103

DCYF kama jareyso canshuuraha dakhliga lacag bixintaada DCYF. DCYF waxa ay warbixinada dakhliga aad naga hesho gaarsiisaa Internal Revenue Service (Adeegga Dakhliga Gudaha, IRS). Waxa laga yaabaa inaad hesho foomka W-2 ee ujeedada cashuurta dakhliga. Haddii aad qabto su'aalo canshuureed, fadlan la xidhidih IRS. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo la xidhiidha bayaanada cashuurta:

Wicitaan bilaash ah: 833-725-3502, xulashada 1
IImaylka: **dcyf.taxreporting@dcyf.wa.gov**



## Xadgudubyada Barnaamijka



Halkii WAC 110-15-0277, bixiyayaasha waa in ay u hoggaansamaan dhammaan mas'uuliyadda ku xusan WAC 110-15-0034, oo ay ku jiraan sheegasho habboon. Ku guuldareysiga in sidaas la sameeyo waxay keeni doontaa xadgudubka barnaamijka, waxaana lagu soo rogi doonaa cunaqabatayn sida ku qoran WAC 110-15-0279.

## Early Achievers

Baraamijka Kaabista Barbaarinta waa aqoonsashada daryeelka ilmaha ee Washington iyo hagaajinta nidaamyada. Bixiyaasha waxa la siiyaa heerka qiimaynta laga bilaabo 1 ilaa 5. Bixiyeyaasha daryeelka ilmaha sharciga leh ee ka qeybqaata Baraamijka Kaabista Barbaarinta waxaa laga yaabaa inay helaan lacag celin dheeri ah oo heerkeedu sarreeyo taas oo ah boqolkiiba qaddarka kabka bisha. Dhiirrigelintan ayaa ah boqolkiiba xadiga maalinta galinkeed iyo maalinta labadeeda galin ee uu sheegto bixiyahu. Kuma jiraan lacagaha safarada dibada ah, abaalmarianaha saacadaha aan la isla qaadan, baahiyaha gaarka ah, diwaangalinta, ama korodhsiimaaha kale ama abaalmarinaha. Barnaamijka Kaabista Barbaarinta Waxay Habeeyeen Lacag bixinta in loo bixiyo si ka duwan lacag bixiniha caadiga ah ee qaansheegta.




Bixiye kasta oo bilaaba inuu aqbalo lacag-bixinta kabka 12 ama ka badan ka dib isagoon aqbalin kabka waxa loo qaadanayaa bixiye kab cusub. Tan waxa ku jira bixiyayaasha sharciga cusub. Dhamaan bixiyaasha cusub ee kabku waa inay buuxiyaan shuruudahan soo socda:

- Isdiwaangali Barnaamijka Kabka Barbaarinta 30 cisho gudohood oo ka bilaabmaysa helitaanka lacag bixinta kabka hore
- Dhamaytir Borofaylka Barnaamija Hore 12 bilood gudahood oo ah isdiwaangalinta Barnaamijka Kabka Barbaarinta ama lacag bixinta u horaysa ee kabka, hadba kii dambeeya
- Gabo-gabee Heerka Tayada 3 inta lagu gudo jiro 30 bilood ee isdiwaangalinta Barnaamijka Kabka Barbaarinta ama lacag bixinta u horaysa ee kabka, hadba kii dambeeya. Barnaamijka barbaarinta ee aan ku dhammayn heerka tayada wakhtigan gudahiisa xaq uma laha inuu helo kabka daryeelka ilmaha ee gobolka ilaa heerka tayada loo baahan yahay la buuxinayo
- Ilaali barnaamijka barbaarinta ee heerka 3aad ee tayada leh ama ka sareeya adiga oo buuxinaya wareegga aqoonsiga tayada saddexdii sanaba mar

Bixiyeyaasha kabka ee kasbaday Heerka Tayada 2 waa inay dhamaystiraan hawlaha hagaajinta oo ay dhamaystiraan Heerka Tayada 3 ama ka sareeya 12 bilood gudahooda ee bilaabaya hawlaha hagaajinta. Bixiyeyaasha kabkaa jira ee aan ku dhammayn Heerka Tayada 3 ama ka sareeya 12 bilood gudahooda laga bilaabo bilawga hawlaha dib u hagaajintu ma sii yeelan doonaan inay helaan kabka daryeelka ilmaha ee gobolka ilaa heerka tayada loo baahan yahay la buuxinayo.

Ogow waxbadan oo ku saabsan Barnaamijka Kaalmada Barbaarinta **www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/early-achievers**.



## Khayraadka

| Macluumaadka Xiriirka | | |
|---|---|---|
| **SOO SHEEGIDDA XADGUDUBKA IYO DAYACAADA**<br>1-866-ENDHARM<br>1-866-363-4276<br>**www.dcyf.wa.gov/safety/report-abuse** | **JAWAABTA TALEEFANKA QOYSASKA**<br>Qoysaska loo oggolaaday WCCC ama SCC waxa ay ka hubin karaan xaalada kiiskooda iyaga oo riixaya 1 kadib marka ay wacaan Xarunta Wicitaanka Adeegga Macaamiisha ee DCYF<br>1-844-626-8687 | **QEYBTA HUBINTA TAARIIKHDA DCYF**<br>1-866-482-4325, xulashada 4-aad<br>**backgroundcheck@dcyf.wa.gov** |
| **XARUNTA WICITAANKA ADEEGGA MACAAMIISHA EE DCYF**<br>Qoysaska waxa ay codsan karaan adeegyada ama soo sheegi karaan isbedellada<br>1-844-626-8687<br>Fakis: 1-877-309-9747 | **IMAANSHAHA ELEKTAROONIGA DCYF**<br>1-844-704-6777<br>**eas.servicedesk@dcyf.wa.gov**<br>**electronic.attendance@dcyf.wa.gov** | **QAANSHEEGASHADA DEGDEGA DSHS**<br>1-877-461-8855 |
| **ADEEGGA MACAAMIISHA SSPS**<br>**360-664-6161**<br>**dshs_sspsmail@dshs.wa.gov** | **BOGGA GOOBTA BIXIYAHA SSPS**<br>1-855-928-3241 | **WCCC KHADKA BIXIYAHA**<br>360-664-6161<br>**1-800-394-4571**<br>**Fakis: 1-877-309-9747**<br>**providerhelp@dcyf.wa.gov** |
| **XAFIISKA KORMEERAHA GUUD EE WAXBARASHADA DADWEYNAHA**<br>**Waxa uu bixiyaa lacagta maalgelinta federaalka si loogu adeego cuntooyin nafaqo leh iyo iyadoo loo marayo Barnaamijka Cuntada Daryeelka Carruurta**<br>**360-725-6206** | **XAFIISKA SOO KABASHADA MAALIYADA**<br>DSHS Economic Services Administration, Office of Financial Recovery, P.O. Box 9501<br>Olympia, WA 98507-9501<br>360-664-5700<br>Wicitaanka Bilaashka ah: 1-800-562-6114<br>Qoraalka Taleefanka: 1-800-833-6388 | |



## Macluumaadka Onlaynka

- Shuruudaha Ruqsada Guriga Daryeelka Carruurta: **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider**
- Heerka Kabka Daryeelka Ilmaha **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/subsidy**
- Xeerarka iyo Shuruudaha Kabitaanka Dhaqaale ee Daryeelka Carruurta: **apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-15**
- Macluumaadka Nidaamka Imaanshaha Elektarooniga ah: **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system**
- Tababarka Nidaamka Imaanshaha Elektarooniga ah: **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training**
- Qoysaska Waxa ay Codsan Karaan: **https://www.washingtonconnection.org/home/**
- Macluumaadka Qaansheegashada Degdegga ah: **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0043.pdf**
- Ruqsada iyo Xeerarka Kabitaanka Dhaqaale: **apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110**
- OFM Heerka Lacag celinta Kabka: **www.ofm.wa.gov/policy/10.90a.pdf**
- Secure Access Washington (Gelitaanka Ammanka ah ee Washington, SAW): **https://secureaccess.wa.gov/myAccess/saw/select.do**
  - Goobta Caawinta: **support/secureaccess.wa.gov**
- Codsiga Qiimaha Baahiyaha Gaarka ah: **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/word/Special_needs_request.docx**

*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, asal ahaan halka uu kasoo jeedo, muwaadinimada ama xaalada socdaal, da'da, wacyiga jinsi ama aqoonsiga jinsiga, mujaahid ama xaalada milatari, xaalada hooyada ilmaha naas-nuujinaysa, iyo helitaanka dareen kasta oo jidheed, ama naafanimo maskaxeed ama isticmaalka hagitaanka eyga ama adeegyada xayawaanku qabto. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka **communications@dcyf.wa.gov**.*

DCYF PUBLICATION EL_0043 SM (06-2024) Somali